# Xirmada Uruurinta Kaadida ee U-bag®
# U-Bag® Urine Collection (Somali)

Kaadida cunugaaga waa in la baaraa sifo aan ugu qorsheeyno daawooyinka. Waxaad u baahan doontaa inaad guriga ka soo qaaddo munnada kaadida oo aad keento (Nationwide Children's Hospital Laboratory Service Center) Xarunta Adeegga Sheybaarka ee Nationwide Children's Hospital.

Qalabka ururintu wuxuu lahaan doonaa:

- Xirmada Uruurinta Kaadida ee U-Bag
- Weel nadiif ah oo leh dabool xiran iyo calaamad
- 3 tuwaalo nadiifinta oo saabuun leh
- Gacmo gashiyada la tuuri karo (ikhtiyaari ah)

## Sida loo Calaamadeeyo Weelka Meydhista

1. Magaca sharciga cunugga ee buuxa – Dhameystir magaca hore iyo magac dambe, si sax ah loo hingaadiye
2. **Mid** kamid ah aqoonsiyada gaarka ah ee soo socda:
   - Taariikhda dhalashada **ama**
   - Lambarka Aqoonsiga Bukaanka **ama**
   - Lambarka diiwaanka caafimaadka ee Nationwide Children's Hospital

   Way ku caawin kartaa inaad sameyso talaabooyinka 1 iyo 2 ka hor intaadan bilaabin.
3. Taarikhda uruurinta muunada (MM/DD/YYYY) - qor tan **kadib** uruurinta
4. Taarikhda uruurinta muunada (oo ay ku jirto subaxdii ama galabtii) - qor tan **kadib** uruurinta

 ©2021, dib loo eegay 2022 Nationwide Children's Hospital Sii socda…

Xaruumaha caafimaadka ee Nationwide Children's waxay ku siin karaan calaamadda diiwaangelinta EPIC si aad weelka ugu dhajisid.

## Sida Looga Soo qaado Muunad Kaadida Caruurta Labka ah

1. Xaqiiji in qaybta hoose cunaaga ay nadiiftahay oo aynan lahay saxaro.
2. Dhaq gacmahaaga, ku diyaarso sahayda meelaha la gaari karo oo gasho gacmo gashiyo, haddii aad rabto.
3. Ka soo qaado mid ka mid ah toweleda saabuunta baakidhka ururinta oo nadiifi xagga sare (burjaha) ee guska ilmahaaga iyo maqaarka xiniyaha ee ka dambeeya guska (qooraha). Ku dhaq dhaqmo wareeg ah. Haddii ilmahaagu aan la gudin, dib u celi buuryada oo si fiican u nadiifi. Iska tuur istiraashada.
4. Ku celi Tallaabada 3 adigoo isticmaalayaa 2da tuweel ee kale.
5. Soo qaado xirmada aruurinta ee U-Bag. Kala fur. Waxaad arki doontaa warqad cad oo dabooleysa geesaha banaanka ee furitaanka u eg qaabka ukunta. Wareega warqadani wuxuu daboolayaa dhinac dhejis ah. Dhammaadka qaybta dheer ee wareegsan qaabka ukunta u eg waxay kujiraan qaybta sare iyo qaybta hoose ee xirmada. Qaybta dhuuban ee wareega qaabka ukunta u eg waa dhinacyada. Ku dheji dusha sare ee xirmada xubinta taranka labka qaybta hoosena ku dhaji qooraha. Ka dib dhinacyada ku dheji labada dhinac ee lugta. Bacda xirmada hoostiisa waxaa ku jiri doona calaamadda afar gees ee buluugga ah oo yar. **Tan saa kudaa**.
6. Kafiiq kala bar qaybta hoose ee warqada cad dabooleysa kalarka. Ka taxaddar inaynan isku laabmiin oo aynan isku dhegin. Kala qaad lugaha ilmahaaga.
7. Dhexgali xubinta taranka iyo qooraha qaybta furan ee U-Bag ah. Ku dheji gunta hoose ee kalarka u dhexeeya gunta ilmaha (malawadka) iyo xiniinyaha. Warqadda wareegsan si adag u riix si uu maqaarka ugu dhego. Sii wad inaad si adag u riixdid adigoo dhinacyada kusii socda. Hubi inaad kala bixisid wixii maqaar ah oo isku laabma oo keeni karaa in uu maqarka iyo warqadda wareegsan uu sameeyo duleedyo. Xiritaan fiican ayaa kaadida ka joojineysa inay soo qubato iyo in ay saxarada gasho bacda. Haddii ay taasi dhacdo, baaristu sax ma noqon doonto, waxaadna u baahan doontaa inaad dib ugu bilowdid adigoo isticmaalayaa xirmo cusub oo muunadda lagu qaado.
8. Ka fuji warqadda cad ee ku taala qeybta sare ee warqadda wareegsan. Warqadda wareegsan ku dheji maqarka. Adigoo ka bilaabaysaa dhinacyada, kor iyo dhinacyada u gudub adigoo si adag oo siman u riixaysaa. Hubi in warqadda wareegsan ay si fiican lagu xiray dhammaan dhinacyada. Bacda aruurinta waa inay si xor ah u laalaaddaa.
9. Xafaayad nadiif ah u xir ilmahaaga. Ka taxaddar in aysan bacda jiidan oo aynan jebinin furka. Bacda aruurinta waa inay ka muuqda hal dhinac ee xafaayadda.
10. La soco bacda 20-kii daqiiqaba mar si aad u aragto markuu ilmahaaga kaadiyo. Marka ugu yaraan 1/4 koob oo kaadi ah ay ku jirto bacda, waxaad diyaar u tahay inaad muunadda u wareejiso weelka nadiifka ah.

11. Si aad kaadida ugu wareejiso weelka nadiifka ah, mar kale dhaq gacmahaaga oo qalaji. Fur weelka. Daboolka hoos u dhig iyadoo gudaha kor u jeeda.
12. Si tartiib ah ilmaha ka fuji U-Bag adigoon daadin kaadida. U-Bag kor ugu hay weelka kaadida ee furan. Soo jiid calaamadda yar ee buluuga ah oo afar geeska ah oo udaa kaadidu in ay ku daadato weelka.
13. Soo qaado furka, adigoo keliya ah taabanaya dhinacyada, kuna rid weelka. Soo wareeji illaa aad dhag ka maqashid. Tani waxay ku ogeysiineysaa in daboolka uu adag yahay oo uu si fiican loo xiray. Tirtir qaybta kore ee weelka oo qalaji.
14. Haddii aad gashan tahay gacmo gashi, iska tuur. Si fiican u dhaq gacmahaaga.

## Sida loo qaado Muunada caruurta dhidiga ah

1. Xaqiiji in qaybta hoose cunaaga ay nadiiftahay oo aynan lahay saxaro.
2. Dhaq gacmahada, ku hagaaji alabta meel aad gari karto, xiro galofis, hadii loo bahd.
3. Si dagan u kalaqaad lalaabadka maqaarka iyo duleylka kadi mareenka iyo siilka.
4. Adigoo isticmaalayaa tuweelka ugu horreeya, ku tirtir dhinaca midigta ee xubinta taranka. Iska hubi inaad tirtid gadaal. Iska tuur istiraashada.
5. Ku soo celi tallaabada 4aad ee dhinaca bidix, hoosta iyo dhexda adigoo isticmaalayaa tuweel cusub mar kasta.
6. Soo qaad oo fur bacda aruurinta U-Bag. Waxaad arki doontaa warqad cad oo dabooleysa geesaha banaanka ee furitaanka qaabka ukunta u eg. Wareega warqadani wuxuu daboolayaa dhinac dhejis ah. Dhammaadka qaybta dheer ee wareegsan qaabka ukunta u eg waxay kujiraan qaybta sare iyo qaybta hoose ee xirmada. Maqarka ku dhaji dusha sare ee bacda oo ka koraysii xubinta taranka qaybta hoosena ku dhaji xubinta taranka dheddigga ah. Ka dib dhinacyada ku dheji labada dhinac ee lugta. Bacda hoosteeda waxaa ku yaala calaamad buluug ah oo yar. **Tan saa kudaa**.
7. Kafiiq kala bar qaybta hoose ee warqada cad dabooleysa kalarka. Ka taxaddar inaynan isku laabmiin oo aynan isku dhegin. Kala qaad lugaha ilmahaaga.
8. Kudhaji gunta hose kalarka maqarka ee u dhaxeyso gunta hoose (malawadka) iyo silka. Warqadda wareegsan si adag u riix si uu maqaarka ugu dhego. Sii wad inaad si adag u riixdid adigoo dhinacyada kusii socda. Hubi inaad kala bixisid wixii maqaar ah oo isku laabmaa oo keeni karaa in uu maqaarka iyo warqadda wareegsan uu sameeyo duleedyo. Xiritaan fiican ayaa kaadida ka joojineysa inay soo qubato iyo in ay saxarada gasho bacda. Haddii ay taasi dhacdo, baaristu sax ma noqon doonto, waxaadna u baahan doontaa inaad dib ugu bilowdid adigoo isticmaalayaa xirmo cusub oo muunadda lagu qaado.
9. Ka fuji warqadda cad ee ku taala qeybta sare ee warqadda wareegsan. Warqadda wareegsan ku dheji maqarka ee koraysaa xubinta taranka dheddigga. Adigoo ka bilaabayo dhinacyada, kor iyo dhinacyada u gudub adigoo si adag oo siman u riixaysaa. Hubi in warqadda wareegsan ay si fiican lagu xiray dhammaan dhinacyada. Bacda aruurinta waa inay si xor ah u laalaaddaa.

10. Xafaayad nadiif ah u xir ilmahaaga. Hubi in aysan bacda jiidan oo aynan jebinin furka. Bacda aruurinta waa inay ka muuqda hal dhinac ee xafaayadda.
11. La soco bacda 20-kii daqiiqaba mar si aad u aragto markuu ilmahaaga kaadiyo. Marka ugu yaraan 1/4 koob oo kaadi ah ay ku jirto bacda, waxaad diyaar u tahay inaad muunadda ku shubto weelka nadiifka ah.
12. Si aad kaadida ugu wareejiso weelka nadiifka ah, dhaq gacmahaaga oo qalaji. Fur weelka. Daboolka hoos u dhig iyadoo gudaha kor u jeeda.
13. Si tartiib ah ilmaha ka fuji U-Bag adigoon daadin kaadida. U-Bag kor ugu hay weelka kaadida ee furan. Soo jiid calaamadda yar ee buluuga ah oo afar geeska ah oo udaa kaadidu in ay ku daadato weelka.
14. Soo qaado furka, adigoo keliya ah taabanaya dhinacyada, kuna rid weelka. Soo wareeji illaa aad dhag ka maqashid. Tani waxay ku ogeysiineysaa in daboolka uu adag yahay oo uu si fiican loo xiray. Tirtir qaybta kore ee weelka oo qalaji.
15. Haddii aad gashan tahay gacmo gashi, iska tuur. Si fiican u dhaq gacmahaaga.

## Markii la soo Qaado Muunada Kadib

1. Eeg calaamada si aad u xaqiijiso magaca sharciga buuxo ee cunugaada, tariqda dhalashada,nambarka bukaanka, amanaambarka diwanaka cafimadka. Kadib, ku qor taariikhda iyo wakhtiga aruurinta oo calaamada ku dhaji weelka. Fadlan la soco, muunadda lama baari doono haddii magaca bukaanka iyo ugu yaraan hal aqoonsi oo kale uusan ku qorneyn calaamadda.
2. Ku meelee weelka kaadida boorso bac ah oo dib loo xiri karo.
3. Haddii ilmahaagu joogo xarun daryeel caafimaad, weelka sii kalkaalisada ama shaqaalaha daryeelka caafimaadka.
4. Wixii aruurin ah ee lagu qaadayo guriga:
   - Muunadda keen (Laboratory Service Center) Xarunta Adeegyada Sheybaarka **30 daqiiqo gudahood** aruurinta ka dib.
   - Hadii aad ku keyni weyso kaadida 30 daqiiqo gudahoooda, waa in lagu keydiyaa meel qaboow ah ila aay sheybarka ka imaneys. Waad ku keydin kartaa qaboojiyaha ama waxaad dul saari kartaa xoogaa barafka dushiisa. **Ha u oggolaan inuu barafoobo.**
   - Muunadda u qaado shaybaarka iyadoo ay kujirto qaboojiyaha oo ka koraysii barafka dushiisa. Dhinacyada weelka ha saarin barafka sabaabto ah waxaa laga yaabaa inay barafayso kaadida.
   - Fadlan soo kaxee canugaaga markaad kaadida keenaysid shaybaarka. Waxaa lagu weydiin karayaa inaad aruurisid muunada cusub.

## Xulashada keenista

Haddii aad rabto inaad ogaato saacadaha ganacsiga iyo goobaha la geeyo muunada, wac Adeegyada Sheybaarka adoo ka wacaaya (800) 934-6575 ama booqo NationwideChildrens.org/Lab.

Xiliga malintii,keen muunada meesha:

- Xarunta adeega sheybar kast ama Xarunta *Close To Home*SM ee Nationwide Children's Hospital.
- Sheybaarka Nationwide Children's Orange ee ku yaala 555 S. 18th Street, Columbus, Ohio 43205.

Fiidkii:

- Waaxda Ogolaanshaha Isbitaalka ee Nationwide Children's ee xarunta guud.

**Fadlan ha geynin muunada kaadida ah Waaxda Degdega.**

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, weydii bixiyaha daryeelka caafimaadka ilmahaaga ama (Laboratory Services) Adeegyada Shaybaarka ka wac (800) 934-6575.